

Lacag hakaaga baaqato kharashaadkaaga korontada oo gacan ka geyso badbaadinta deegaanka (environment)

Barnaamijka Kabcinta Korontada ee Victoria (Victorian Energy Upgrades - VEU), waxaad ku heli kartaa wax soo saar koronto oo qiimo jaban taas oo ay lacag kaaga baaqaneyso biilasha korontada.

Somali | Soomaali

Qorshaha Bartilmaameedka Waxtarka Korontada Victoria (Victorian Energy Efficiency Target) xaashida xaqiiqda ee macaamiisha

VEU waa hindise ikhtiyaari ah oo ay dawladda Victoria la timid kaas oo dadka Victoria ku nool siinaya qiil ay si waxtar leh ugu hormarin karaan korontada guryahooda iyo ganacsigooda. Tani waxay kaa caawinaysaa dhimista biilasha korontada waxayna yaraynaysaa qiiqa gaaska loo yaqaan greenhouse gas emissions.

U qalmida/mudnaanta

Qoys kasta iyo ganacsi kasta oo ku yaal Victoria ayaa ka qayb qaadan kara barnaamijka oo heli kara alaab iyo adeegyo koronto wax ku ool ah oo la dhimay. **Ka qaybgalkaagu waa mid ikhtiyaari ah.**

Ka qayb qaadashada barnaamijka waa ay sahlan tahay

Tallaabada 1. Eeg badeecada la heli karo.

Tallaabada 2. Dooro badeecada aad rabto inaad soo xirato si aad u yarayso kharashka korontadaada.

Tallaabada 3. La xiriir bixiye la aqoonsan yahay. Waxaad u baahan tahay inaad la shaqeyso bixiye la aqoonsan yahay kaas oo loo oggolaaday inuu kuu rakibo alaabaha korontada waxtarka leh ee VEU. Bixiyeaasha la aqoonsan yahay ayaa sidoo kale mas'uul ka ah inay kuu qorsheeyaan qiimo dhimista ama in qiimo jaban aad ku heshid alaab kasta oo aad dooratid inaad soo xirato. Waxay kuu sheegi doonaan:

- badeecada aad isticmaali karto
- cida kuusoo xiri karta badeecada aad doorato.

Si aad u ogaatid alaabaha la heli karo ama bixiye (provider) la aqoonsan yahay

Ka wac miiska caawinta (helpdesk) ee VEU **(03) 9032 1310**
Fadlan taabo 1 si aad u hesho macluumaadka ku saabsan casriyaynta korontada. Markaad maqashid in laguugu xiray, taabo 0.

Ma waxaad tahay dhagool', maqalka ama hadalka qof uu dhibayo?

Fadlan kala xiriir Adeegga Gudbinta Qaranka (National Relay Service) **133 677** ama www.relayservice.gov.au



Biilashaada korontada lacag hakaaga baaqato adoo isticmaalaya VEU

	QOYSASKA	GANACSIYADA
Inta hadda u baaqato sannadkii	Iyada oo ay ku xidhan tahay casriyaynta/s, celcelis qoyskiiba waxaa biilasha korontada uga baaqan karta inta u dhaxaysa \$120 iyo \$1,100 sannadkii.	Iyada oo ay ku xidhan tahay ganacsigaaga inta uu la egyahay iyo casriyaynta/s, waxaa kuu baaqan karta inta u dhaxaysa \$500 iyo \$74,000 sanadkii.

Xuquuqdaada hoos timaada barnaamijka VEU

Barnaamijka VEU waxa uu leeyahay Xeerka Anshaxa kaas oo dejinaya heerarka ugu yar ee dhinaca dhaqanka ee loogu talagalay in lagu ilaaliyo macaamiisha. Tani waxay khusaysaa qof kasta oo ku lug leh bixinta (delivering) ama suuqgeynta (marketing) casriyayntan.

Hawlaha suuq-geynta

Haddii bixiye la aqoonsan yahay ama qolo saddexaad oo magacooda ku shaqeysa ay kula soo xiriiraan si ay kaala hadlaan barnaamijka VEU waa inay:

- kaliya kaa iibiyaan ama kaala hadlaan suuq-geynta barnaamijkaas VEU haddii aad ka weyn tahay 18 sano oo aad awoodid inaad fahanto macluumaadka lagu siiyay
- kuu sharaxaan in barnaamijku yahay mid ikhtiyaari ah oo aysan qasab kugu eheen inaad ka qayb qaadato
- kuu sharaxaan sida ay ku heleen cinwaankaaga (address kaaga) iyo sababta ay u soo booqanayaan gurigaaga ama ganacsigaaga
- kuu sheegaan ganacsiga ay u shaqeeyaan
- had iyo jeer sitaan kaarka aqoonsiga oo leh sawir, magacooda oo dhameystiran, meesha lagala soo xiriiri karo, ABN, iyo faahfaahinta qandaraaslaha ugu weyn
- waa inaysan cadaadis ku saarin si ay kaaga iibiyaan ama u suuq-geeyaan badeecadaha ama adeegyada
- waa inay bixiyaan macluumaad sax ah oo ku saabsan alaabta ama adeegyada la bixiyo iyo inay tahay mid ku haboon
- waa inaysan sheegin wax been ah ama khiyaano ah - tan waxaa ka mid ah inay u shaqeeyaan Dowladda Victoria ama Guddiga Adeegyada Muhiimka ah, ama in Dowladda Victoria ay bixiso macluumaadka xiriirka gaarka ah (sida lambarada taleefanka) ayadoo ujeedaduna tahay suuqgeyn.


Si aad u ogaatid alaabaha la heli karo ama bixiye (provider) la aqoonsan yahay

Ka wac miiska caawinta (helpdesk) ee VEU **(03) 9032 1310**

Fadlan taabo 1 si aad u hesho macluumaadka ku saabsan casriyaynta korontada. Markaad maqashid in laguugu xiray, taabo 0.

Ma waxaad tahay dhagool', maqalka ama hadalka qof uu dhibayo?

Fadlan kala xiriir Adeegga Gudbinta Qaranka (National Relay Service) **133 677** ama www.relayservice.gov.au



Xuquuqahaaga hoos yimaada barnaamijka VEU ayaa sii socda

Qandaraasyada

Haddii aad la shaqaynayso bixiye la aqoonsan yahay (accredited provider) ama qolo saddexaad oo iyaga ku shaqaysanaya, waa inay:

- kaliya un la gal heshiis qof 18 jir ah ama ka weyn
- hubi inay kuu sheegaan shaqo kasta oo la qabanayo oo aad taas fahantid inta aan shaqada la bilaabin ka hor
- ku siiyaan macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga hoos yimaada barnaamijka VEU, iyo sidoo kale casriyeynta ay bixinayaan iyo qandaraaska/heshiiska. Qandaraasku waa inuu faahfaahiyaa badeecada/adeegga, qiimaha iyo kharash kasta oo dheeraad ah, nidaamyada joojinta, iyo waqtiyada aad isaga bixi kartid ka hor (cooling-off periods)
- waa inay kuu sheegaan oo ay hubiyaan inaad fahantay shaqo kasta oo la qabanayo ka hor inta aan la bilaabin
- waa inay kuu sheegaan cidda kuu rakibaysa qalabka casriyaynta haddii aad aqbashid badeecad ama adeeg
- waa inay ku siiyaan nambar telefoon si aad ula xidhiidho qofka ama shirkadda rakibaysa qalabka casriyaynta.

Qabashada shaqada

Marka bixiye la aqoonsan yahay ama cid saddexaad oo iyaga u shaqaysa ay bilaabayaana shaqo, waa inay:

- kaliya bilaabaan shaqada marka aad ogolaansho bixiso
- waa inaysan bilaabin wax shaqo ah haddii aysan ku ogeysiin faahfaahinta shaqada. Tan waxa ku jiri kara wakhtiga iyo taariikhda, alaabta/adeegga la rakibayo, iyo macluumaadka qofka hawsha qabanaya, sida bixiyehooda la aqoonsan yahay iyo faahfaahinta xidhiidhka
- kaliya la hadlaan qof ka weyn 18 sano
- ku siiyaan, marka shaqada la dhameeyo, faahfaahintooda xiriirka si aad ula xiriirto iyaga haddii loo baahdo
- ku siiyaan macluumaadka xallinta khilaafaadka iyo tilmaamo kasta iyo macluumaadka damaanadda ee alaabta/adeegyada lagu rakibay.

Ma rabtaa inaad nagala hadasho barnaamijka VEU?

Fadlan wac **(03) 9032 1310** ama email noogu soo dir veu@esc.vic.gov.au

Xagee kale oo aad ka heli kartaa caawimo ku saabsan xuquuqdaada macaamiil ahaan?

Haddii aadan rabin inay kooxda suuq-geynta (telemarketing calls) kusoo wacaan, waxaad iska diiwaangelin kartaa **Diiwaanka Hay Soo Wicin (Do Not Call register)**, taas oo ka dhigaysa sharci-darro in qof kasta oo suug-geeye Australiyaan ah ama dibada ah ee aan fasax u heysan uu kula soo xidhiidho.

Booqo www.donotcall.gov.au/ ama wac **1300 792 958**.

Haddii aad qabto cabasho ku saabsan sheegashooyin been abuur ah ama marin habaabin ah, suuqgeyn teleefoon ah ama albaab garaacid, la xidhiidh Arrimaha Macmiilka Victoria (Consumer Affairs Victoria).

Booqo www.consumer.vic.gov.au/contact-us ama wac **131 450**.

